



GUDNIINKA GABDHAHA  
IYO HAWEENKA

## WAA MAXAY GUDNIINKA?

Gudniinka waxaa loola jeedaa wax kasta oo qaliin ah kaas oo aan loo sameyn caafimaad dartiis kaas oo la xiriira xubinta taranka oo qeyb ka mid ah loo jaro qeyb ahaan ama si buuxda. Gudniinka wuxuu dhaqan caadi ah oo qaangaarnimada ka mid ah ka yahay bulshada gudniinka ku dhaqanta.

Gudniinka waxaa inta badan lagu sameeyaa qaab aan nadiif aheyn xanuun baabi'ye la'aantiis. Wuxuu sababi kartaa dhaawac iyo dhibaatooyin culus oo nafsigan ah. Haweeneyda la guday waxay ku dhibtoota marxaladda caadada waxayna la kulmi kartaa caabuq xagga kaadida iyo makaanka ilaa xitaa da'yaraanteed. Nolasha xagga galmada waxay noqon kartaa mid adag taas oo saameyn ku yeelan karta xiriirka lamaanaha. Isbadalka aan soo noqoneynin ee jirka wuxuu keeni karaa dhibaatooyin xagga dhalmada ah wuxuuna khatar gelin karaa hoo-yada iyo caafimaadka dhalaanka yar.

## GUDNIINKA WAA MAMNUUC FINLAND

Finland gudniinka dumarka iyo gabdhaha yaryar laguma sameyn karo sharciga ayaana diidaya. Gudniinka waa jirdil aad u xun kaas oo xukunkiisu yahay xabsi. Qaliin sameeyaha iyo dadka kale ee ka qeyb qaata sameyntiisa waxa ay ku muteysan karaan dembi.

Haddii qaliinka lagu sameeyay wadankaaga ka hor imaanshaha Finland, mas'uuliyiinta ka welwel qabi karaan xaaladda gabdhaha kale ee aan gudneyn ee qoyska.

Qaadashada sharciga degaanshaha kadib waxaan sameyn karnaa haddii loo baahdo qaliin furitaan ah kaas oo lagu qafii-finayo xanuunada ama dhalmada. Haddii qaliinka furitaanka ah xiligga foosha, hooyada toliin laguma sameynayo sababtoo ah dib u tolis dambe waxay noqon kartaa dembi jir-jirdileed. Isbitaalka waxaa la weydiisan karaa caddeyn qoraal oo ku aadan qaliinka furitaanka lagu sameeyay isbitaalka.

## MAXA DHACAYA HADDII GUDNIINKA GADAAL LAGA SAMEEYO?

Haddii ilmaha degan Finland uu ku sugan yahay khatar ah in gudniin lagu sameeyo amaba tusaale ahaan lagu soo guday wadankiisa xiliga fasaxa ah, shaqaalaha dowladda waxay mas'uuliyad ka saaran tahay in ay sameeyaan wargelin la xiriirta badbaadada caruurta isla markaasina booliisku wuxuu bilaabayaa in uu baaro in ilmahaasi dembi laga galay.

Haddii sharciga degaanshaha lagu bixiyay hanjabaad gudniin darteed, dib ka sameynta gudniinka sharciga kadib waxay hor-seedi kartaa luminta sharciga iyo in qofka dib loogu soo musaafuriyo dalkiisii.

## GUDNIINKA WUXUU MUHIIM U NOQON KARAA MAGANGALYO DOONIMADA

Haddii gudniinka lagu sameeyay adiga iyo ilmahaaga uu idiin sababayo xanuuno aad u daran, u sheeg shaqaalaha caafimaadka ee xerada aad ku jirtid. Isla xaqiijiya in loo baahan yahay iyo in kale in shahaado dhaqtar loo gudbiyo hay'adda socdaalka ee Finland ka hor wareysiga.

Hay'adda socdaalka waxay macluumaadkaada ku heli kartaa oo kaliya adiga ogolaanshahaaga. Hanjabaad gudniin ama dhibaatooyin daran oo kaasoo gaaray gudniin horay laguugu sameeyay waxay noqon karaan sabab sharciga laguugu siiyo sidaas darteed kaga hadal arimahaasi xiliga wareysiga.

### GUDNIINKA

- Qaliin aan caafimaadka dartiis loo sameynin.
- Wuxuu sababi karaa dhaawacyo nafsigan ah iyo xanuuno jirka ah oo aad u daran.
- Finland waa dembi-jirdileed iyo arin quseysa badbaadada caruurta.
- Wuxuu muhiim u noqon karaa dacwada magangalyo-doonima.